



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

September 29, 2016

Gacaliyeyaaal Qoysaska Lyndale Community School,

Dugsiyada Dadaweynaha Minneapolis (MPS) ayey dhab ka tahay inay siiyaan ardayda oo idil waxbarasho heer sare ah, si cunugaagu ugu guulaysto dugsiga iyo noloshiisa. Si aan u xaqijinno guulaysiga cunugaaga, waxaan u dejinnay heer naqdi sarreya ee ka fal celin kara waxyabaha lagu baro fasalladeenna. Sannad dugsiyeedka soo socda waxaan eegaynaa qiiimayn cabbirro kala duwan oo muujinaya siyaabaha dugsigeennu u guulaysanayo. Tan ayaa xaqijinaysa inaan gaarno himmiladeenna ah in ardayda oo idil ay ku guulaystaan dugsiga iyo noloshooda.

sannadkan Lyndale Community School ayaa loo qoondeeyey inuu noqdo dugsi xoog saaraya (focus school) sida uu qabo Qaynuunka Federaaligga ah ee Dugsiga Hoose & Sare (Elementary and Secondary Education Act) (ESEA). Qoondaynta ayaa ku salaysan xogta hawl fulinta ardayga, taasoo ku meelayoutaysay dugsigeennu inuu ka mid yahay boqolkiiba tobanka ugu badan ee bugcadda guul gaadhka ardayda u dhixeyya ee gobolka.

Sannad dugsiyeedkan waxuu noqonayaa sannadka koowaad ee saddex sano ee habraaca hagaajinta dugsiga (three-year process of school improvement). Qorshayanta habraacaasi ayaa loola jeedaa hagaajinta hawl-fulita ardayda oo idil. Inkastoo badida waxqabadyada dib u hagaajintu ay yool leeyihiin, isbeddello kale ayaa ka dhici kara dugsiga. Si aan uga guul gaadhno hawshaasi muhiimka ah, waxaan yeelan doonaan koox dib-u-hagaajin ka kooban shardi-hayeyaa kala duwan, ayna ku jiraan waalid. Wuxaan idinku dhiirrigalinaynaa inaad xubin ka noqoto kooxda dib-u-hagaajinta; haddii aad danaynayo soo wac lambarka hoose.

Qoysaska iyo bulshada ayaa xuddun u ah qorshaheenna dib-u-hagaajinta dugsiga. Waxaa lugugu martiqaday inaad nagala soo qaybgasho kulankeena sanadlaha ah ee Xaalada Dugsiga iyo Kulanka Title I. Ula jeedka Xaalada Dugsiga iyo Kulanka Sanadlaha ah ee Title I waa in lugu siiyo waalidka/yo daryeelayaasha warbixin ku saabsan xaalada dugsiga ku sugaran yahay hada iyo qorshaha hagaajinta ee dugsiga. Dugsigu waxaa uu waalidka la wadaagi doonaa hadafkiisa iyo waxyaabaha uu mihiimada siinayo iyo hababka uu ku gaarayo hagaajinta iyo waalidku sidii ay uga qaby qaadan lahaayeen waxbarashada sanadkoo idil. Kulankani waxaa lugu sharxi doonaa ula jeedka Title I iyo xiriirkha waalidiinta/daryeelayaasha la rajaynayo in ay helaan waxyaabo qoyseeya kor u kaca waxbarsho ee caruurtooda. Hadii uusan kulanku dhicin ama aadan helin warbixinta, Na soo waydi maalinta iyo wakhtiga kulanka la qaybanayo

Ka qayb qaadashadaada iyo kaalmadaada ayaa muhiim u ah guulaysiga cunugaaga. Wuxaan kugu dhiirrigalinaynaa inaad la xiriirto cunugaaga macallimiintiisa, saad u barato sida ugu wanaagsan ee cunugaagu fasalka wax ugu baran karo. waa kuwaan hoose dhawr waxyaabood eed samayn karto ee ka caawin kara cunugaaga waxbarashadiisa:

- Hubi in cunugaagu dugsiga tago maalin walba waqtiga loogu talagalay.
- U same meel deggan oo cunugaagu ku qabto shaqo gurigiisa ama wax ku akhriyo.
- Kala hadal cunugaaga dugsiga.

Wuxaan idinka rajeynaynaa inaad sii waddaan ku shuqlanaanta iyo wada shaqaynta si sannad dugsiyeedkani u noqdo mid wanaagsan! Fadlan nagala soo xiriire 612-668-4000 haddii aad u baahan tahay macluumaa dheeraad ah ee la xiriira dadaalka dib-u-hagaajinta dugsiga ama sidaad uga qayb qaadan karto.

Si daacadnimo leh,

Renee James  
Maamule/Principal